Royal College of Anaesthetists

Vascular Anaesthesia Society of Great Britain & Ireland

# Suuxdintaada qalniinka xididada dhiiga

Buug yarahan wuxuu ku siinayaa macluumaad kaa caawinaayo si aad isugu diyaariso qaliinka ku saabsan mid ka mid ah xididka ugu weyn dhiigga badan ee jidhkaaga. Tani waxay noqon kartaa qoortaada, calooshaada (calooshaada) ama lugahaaga. Wuxuu kusiinayaa macluumaad ku saabsan noocyada kala duwan ee suuxintaa ee loo isticmaali karo qalinka iyo waxa aad dooran karto.

Fadlan weydii dhakhtarkaaga qalliinka, suuxiyaha ama kalkaaliyaha qiimaynta hore qaybta buug yaraha eed aad isticmaaleyso Waxa kale oo laga yaabaa in ay waxtar u noqoto in laga akhristo buug yaraaha RCoA ee noocyada kala duwan ee suuxinta mar haddii aad ogaato nooca qalliinka iyo suuxdinta ee aad qaadanayso. Halkan ayaa laga heli kara asaga oo afaf kala duwan ah: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Nuxurka

Buug-yarahaan waxa uu sharaxaad ka bixiyaa:

- Isku diyaarinta qaliinka:
- Suuxdinta qalinada xididdada dhiiga caadiga aah
  - Qalinka Halbowlayaasha dhiigga
  - Qalliinka dayactirka Habowlaha ee aortic aneurysm
  - Qalliin halbowle mareenka lugahaaga
- Xanuun baabi'iye qaliinka kadib
- Halista iyo go'aan gaarista la isla wadaago
- Halkee laga heli karo macluumaad dheeraad ah?

# Isku diyaarinta qaliinka

## Helitaanka shaandhada qalinka

Kala shaandhee bukaannada iyo kuwa awoodo inay horumariyaan caafimaadkooda iyo qaabnololeedkooda kasoo kabsashada qalinka si dhakhso ah oo dhib yar.

Waxaa jira waxyaabo badan oo aad sameyn kartid si aad naftaada ugu diyaarisid qalliinka. Xitaa isbeddellada yaryar waxay sameyn karaan farqi weyn.

- Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad kordhiso heerarkaaga dhaqdhaqaaqa jidhka oo aadna hagaajiso cuntadaada.
- Haddii aad cabto ama aad sigaar cabto, waa inaad ka fikirtaa inaad iska jarto ama aad joojiso.
- Haddii aad qabto dhibaato caafimaad oo soo jireen ah, kala tasho dhakhtarkaaga gaarka ah haddii ay jiraan wax aad samayn karto si aad u hagaajisid qalliinka ka hor.

Kheyraadkeena **Si fiican iyo si deg-deg ah uga bogsashada qallinka** waxuu ku siin doonaan macluumaadka aad u baahan tahay si aad u noqoto mid caafimaad qaba oo si fiican ugu diyaar garoobo qalliinkiisa. Fadlan ka eeg barteena nuqul ka mid ah buug-yaraha kaasoo halkan ku diyaarsan asaga oo afaf kala duwan ku qoran: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

Kooxaha daryeelka caafimaadkaaga waxay awoodi doonan in ay ku siiyaan macluumaad ku saabsan kaalmada laga heli karo degmadaaga.

## Qiimaynta daawada suuxinta qalliinka ka hor

Iyada oo qayb ka ah Isku diyaarintaada qalliinka xididdada dhiigga, dhakhtarkaaga qalliinka ayaa ku weydiin doona inaad tagto rugta qiimaynta qalliinka ka hor ee cisbitaalka. Kalkaalisada qiimaynta hore ayaa qiimayn doona fursadaha ku habboonaanshaha caafimaadkaaga ee qaliinka ee la tixgelinayo. Waxa kale oo aad la kulmi kartaa dhakhtarka suuxdinta ee rugtan caafimaad.

Ballantan waxaa ku jiri doona fiirinta si faahfaahsan xaalado kasta oo caafimaad oo laga yaabo inaad qabto sida wadne xanuun, dhibaatooyinka neefsashada (sida neefta ama boronkiitada raaga), sonkorowga, dhiig-karka, dhiig karka ama cudurada kelyaha. Qaar badan oo ka mid ah xaaladahan waxay saameyn karaan soo kabashada qalliinka waxayna u baahan yihiin in la xakameeyo sida ugu macquulsan ka hor qalliinkaaga.

Inkasta oo dhiig-yarida (byaraanta burta) ay tahay mid caadi ah, waxay la wehliya natiijooyin ka sii xun qalliinka weyn ka dib. Waxa lagaa baari doonaa dhiig-yaraan qiimayntaada qalliinka ka hor. Haddii dhiig-yaraan kugu dhacdo ka hor inta aan lagu qalin oo wakhtiguna kuu ogolaado, waxa keenay dhiig-yaridaada waa la baari doonaa oo la daawayn doonaa.

Haddi ay khusayso, dhaqtar ku takhasusay daryeelka dadka da'da ah ayaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inuu qiimeeyo caafimaadkaaga guud ee jir iyo maskaxeed.

Tani waxay sidoo kale caawin doontaa shaqaalaha daryeelka caafimaadka si ay u hubiyaan in daryeelka saxda ah iyo taageerada aad heli karto ka dib markaad isbitaalka ka baxdo.

Qaar ka mid ah qalliinnada xididdada dhiigga ayaa cadaadis saari kara wadnahaaga. Dadka qaba cudurrada xididdada dhiigga waxay sidoo kale halis sare ugu jiraan inay qaadaan cudurrada wadnaha. Sidaa darteed waa muhiim in la qiimeeyo shaqada wadnuhu ka hor qalliinka iyada oo la adeegsanayo baaritaanka wadnaha (''nuuc kamid ah computerrada wadnaha akhriya'' ee electrocardiogram ama ECG "nuuc kamid ah computerrada wadnaha akhriya" – eeg qaybta kormeerka iyo qalabka).

Waxaa laga yaabaa in laguu gudbiyo dhaqtar ku taqasusay wadnaha, kaas oo wax ka beddeli kara daawadaada ama codsan kara baaris dheeraad ah (hoos eeg).

Daawooyin kasta oo cusub ayaa badiyanaa ahaan doonta abad dhaqtarksaga gaarka ahna waa la wargelin doonaa. Tani waa inay sidoo kale faa'iido u yeelato ilaalinta wadnahaaga wakhti dheer qalinka ka dib.

## Tijaabooyin dheeraasad ah oo ku saabsan jirdhiska guud

Iyada oo ay ku xiran tahay nooca qaliinka la qorsheeyay iyo caafimaadkaaga caafimaad, waxa kale oo laga yaabaa in lagu weydiiyo in aad samayso mid ama ka badan oo ka mid ah baadhitaanada soo socda.

### Baaritaanka jimicsiga wadnaha iyo sambabada (CPET)

Baaritaankaan waxaa la sameyn karaa haddii aad isku diyaarineyso dayactirka aortic aneurysm (eeg qaybta xigta) ama habab kale haddii aad ka shakisan tahay dhibaatooyinka wadnaha ama sambabada. Waxaa lagu waydiin doonaa inaad baaskiil wadi karto baaskiilga jimicsi qiyaastii 10 daqiiqo. Baaritaanku wuxuu muujinayaa sida wadnahaaga, sambabadaada iyo wareegga dhiiggaagu uga jawaabaan jimicsiga. Tani waxay ka caawinaysaa kooxda daryeelka caafimaadka inay ogaadaan habka kugu habboonaan kara adiga iyo haddii aad u baahan doonto taageero dheeraad ah inta lagu jiro qaliinka iyo isla markiiba ka dib. Tusaale ahaan, waxay kuu soo jeedin karaan, qalitaanka ka dib, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad wakhti ku qaadato qaybta ku tiirsanaanta sare (HDU) ama qaybta daryeelka degdega ah (ICU), halkaas oo si dhow laguula socon karo. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan joogitaanka HDU iyo ICU qalliin ka dib waxaad ka heli kartaa **Buug-yarahayaga suuxinta qalliinka weyn** kaas oo lagu heli karo luqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

### Sawir-qaadista wadnaha ee (MRI)

Tani waxa loo isticmaalaa in laguu hubiyo sida dhiiga uu ugu socdo wadnahaaga iyo sidoo kale muruqa iyo shaqada dhiig wadayaasha wadnaha. Inta lagu jiro baaritaanka waad wali waxaad ku seexan doonta sarir, ,taasoo uu daqaqeysa gudaaxa sawirka qaade qaab tunnel oo furaan. Sawirku wuxuu socon karaa wax

kabadan xaal saac wuxuuna noqon karaa miid yara buuq ah, laakin waxaad awoodi doonta inaad kudhagaysato muusiga sameecadaha waadna la hadhli kartaa sawir-qaadaha inta laagu jiro sawirka.

### Tijaabada wadnaha 'stress' iyadoo la isticmaalayo daawooyin (dobutamine stress echo ama sawirada myocardial perfusion)

Kuwaan waxay Macluumaad dheeraad ah ka bixinaayaa sida dhiigs uu ugu socdo wadnahaga iyo wanaagsan ee waadnahu u garaaco marka uu waalacu ku Jiro. Maaddaamaa aysan jimicsi ku jirin, waxay ku habboon yihiin dhaqdhaqaaqa xaddida ee bukaanka.

Inta laagu Jiro baaritaanada dawo ayaa lagaga mudi doonaa xidhiidhka si waadnaha loo galiyo xaddi xakameyssn oo walaac ah. Mashiinka sawirka ayaa loo isticmaalaa si loo arko sida wadnuhu uga jawaab celiyo. Xubin ka tirsan kooxdaada daryeelka caafimaadka ayaa kula joogi doona mar walba.

### Tijaabada neefsashada (Baaritaanada shaqada sanbabbada)

Kuwan waxay tijaabiyaan dadaaladaada ugu badan ee neefsashada iyagoo ku siinayaa inaad si adag ugu afuufo tuubo yar. Haddii aad qabto cudurka sanbabbada oo lagaa daweynayo, waxaa laga yaabaa in in lagu qiimeeyo sida wanaagsan ee sanbabadaadu u shaqeeyaan. Waxa kale oo laga yaabaa inay caawiso in la ogaado cudurka sanbabbada xannibka ee daba dheeraada ee (COPD), cudur sanbabbada oo si socda kaasoo ku badan bukaanada u baahan qaliinka xididdada, gaar ahaan kuwa sigaarka cabba ama aad u sigaar cabba.

## Maalinta qalliinka

Kalkaalisada ama dhakhtarka suuxinta ayaa ku ogeysiin doona sida saxda ah marka aad u baahan tahay inaad joojiso cunista iyo cabbitaanka ka hor qaliinka. Sida caadiga ah, waxaad awoodi doontaa inaad wax cunto ilaa lix saacadood aadna cabto biyo ilaa laba saacadood ka hor qaliinka, ama wax ka yar xaaladaha qaarkood.

Mar haddii qalinkaaga laguu gudbiyo waxaad la kulmi doontaa dhakhtarkaaga suuxinta, dhakhtarka qaliinka iyo kooxda daryeelka caafimaadka. Waxaa lagu geyn doonaa qolka qalliinka halkaasoo baaritaanada ugu dambeeya laguugu sameyn doono Waxa lagugu xiri doonaa qalabka la socodka. Qalinada xididdada dhiigga sida caadiga ah waxay u baahan yihiin la-socod dheeraad ah sida khadka halbowlaha (eeg 'qalabka iyo la socodka la isticmaalo inta lagu jiro qalliinka xididdada xididdada')

# Suuxdinta qalinada xididdada dhiiga caadiga aah

Qaybaha soo socda waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan hababka qaliinka xididdada dhiigga ee ugu caansan iyo noocyada daawada suuxintaa qalinka la isticmaalo. Dhammaan macluumaadka kuma khuseyn doono adiga, marka waxaad weyddiisan karta kooxdaada daryeelka caafimaadka inay kuu sheegaan qaybaha ay tahay inaad akhrido.

## Carotid endarterectory (xididdada dhiigga halbowlaha)

Qalinkan waxa loo sameeyaa si looga saro ururinta kaydka dufanka leh (plaque) ee xididdada dhiigga halbowlaha, kaasoo dhiigga u qaada maskaxdaada. Haddii socodka dhiigga lagu yareeyo huurada waxay u horseedi kartaa istaroog ama istaroog-yar (weerar iscelin ku meel gaar ah ama TIA). Carotid endarterectomiyada(qalniinka qoorta) waxaa lagu samayn karaa iyadoo la isticmaalayo suuxin guud ama suuxin maxalli ah.

Dhakhtarkaaga suuxiyaha ayaa wax badan kasharixi doona faaidooyinka iyo qasaaraha guud ee suxdintaa maxaliga ah. Waxay kuugu la heshin doonaan adiga iyo dhakhtarkaaga qaliinka xulahada kuug u fiican qaliinkaga taasoo ku salenaysan xaladaa halbowlahagaa carotid, qiimeyntaada caafimaad iyo xulashooyinka.

Suuxdintaada maxaliga kadib, waad soo jeedi doontaa inta lagu jiro hawsha Tani waxay faa'iido u leedahay in kooxda daryeelka caafimaadku ay kaa hadlaan kuna weydiiyaan inaad qabato hawlo fudud inta lagu jiro hawsha, sida tuujinta gacanta ama maroojinta suulashaada. Sidan wwxay ku ogaan karaan inay jiraan wax dhibaatooyin ah oo ku saabsan dhiigga ku qulqulaya madaxaaga iyo qoortaada.

Mashiinka ultrasound waxaa loo isticmaalaa in lagu hago cirbadda suuxinta maxaliga ah ee qoortaada si loo kabuubiyo xididdada goobta siiya Waxaa kale oo laga yaabsa in lagu siiyo dawada suuxinta si ay kaga cawiso inaad sexato inta lagujiro howsha. Qalinka wuxuu cadi maahan socdaa inta u dhaxeyso hal ilaa labo uuna dhamaado swddex sacadood.

Waa caadi in aad dareento xoogaa cadaadis ah marka hawsha la bilaabo, laakiin haddii aad dareento raaxo darro ah inta lagu jiro qaliinka, waa inaad u sheegta dhakhtarkaaga qaliinka waxayna ku siin karaan suuxdin maxaliga ah oo dheeraad ah.

Sida naadirka ah, bukaanada qaar waxaaa laga yaaba in la siiyo suuxdin guud oo la socoto mida maxalliga ah. Xaaladdan oo kale, qalinka si ku meel gaar ah ayaa loo joojin doona si loo siiyo suuxdinta guud. Suuxinta guud wwxaa laga yaabaa dhakhtarka suuxinta inuu hubiyo qulqulka dhiigga ee madaxaaga isagoo isticmaalaya kormeero gaar ah.

### Soo kabashada ka dib endarterectomy carotid (Qaliinka Halbowlaha dhuunta)

Kadib qalitaanka carotid caadi ahaan aadi wwxaad tagi doontaa aaggaa soo kabashada ama HDU si si taxadar leh lagula socdo dhowr saacadood. Marka dhakhtarta suuxiyaha iyo dhaqtarka qaliinka ay ku faraaxsan yihiin in dhiig karkaagu uu degan yahay,kana soo kabsatay suuxinta oo aad daremeyso raaxo, waxaad awoodi doonta inaad tagto qeybta jiifka.

## Qalinka dayactirka (halbowlaha weyn)

Bararka habowlaha weyn ee caloosha (aortic aneurysm-AAA) waa balaarsanaan ama barar kudhaca halbowlaha ee xididka dhiiga ee ugu wayn ee kasoobbaxa wadnaha ila calooosha (caloosha) iyo lugahaaga. Waa uu sii weynaan karaa mudo kadib,taas oo u horseedi karto inuu dilaaco oo uu keeno dhiig bax gudaha ah oo nafta halis galin karo.

Waxaa jiraa laba nooc oo waaweyn oo qaalin ah oo logutala galay qalinka bararka halbowlaha weyn ee caloosha.

- **Dayactirka bararka halbowlaha furan (AAA furan):** caloosha waa la dilaaciyaa oo xididka dhaawacana waxaa lagu bedelaaa tuubo macmal ah.
- **Dayactirka bararka halbowlaha (Endovascular aortic aneurysm-EVAR) (EVAR):** Kani waa qaliin tuubo lagu gelinaayo god-fureed (tuubo gaaban) la dhax marinaayo halbowlaha gumaarkaaga si loo xoojiyo xuubka halbowlahaaga.

Waxaa jira faa'iidooyin iyo halis labada nooc ee qaliinka. Kuwani waxaa lagala hadli doonaa, iyada oo la tixgalinayo darnaanta dhaawaca halbowlahaaga iyo natiijooyinka tijaabada qiimayntaada qalliinka ka hor.

### Dayactirka (AAA) halbowlaha furan

Suuxinta guud ayaa had iyo jeer loo baahan yahay halbowlaha furan. Waxaad u baahan doontaa la socod dheeraad ah sida tuubada halbowlaha lagu xiro iyo suurtogalnimada kateetarka xididka dhexe (eeg 'qalabka iyo la socodka la isticmaalo inta lagu jiro qalliinka xididdada xididada'). Daawooyinka xanuun baabi'yaha yareeya waxaa laga yaabaa in lagu siiyo kateetarka epidural'ka ama nabarka (eeg xanuunka qalliinka kadib).

Kadib, waxaad caadiyan aadi doontaa ICU ama HDU. Halkan, kalkaaliyahaaga iyo kooxda caafimaadkaga ayaa hubin doona inaad haysatid dhacaano kuugu filan, in wadnahaaga, sambabadaada iyo kelyahaagu ay si fiican u shaqeynayaan oo aad caadi tahay. Haddii wax walba hagaagsan yihiin, caadi ahaan waxaad ku noqon doontaa qaybta qalliinka hal ama laba maalmood ka dib.

### Dayactirka bararka halbowlaha (EVAR)

Haddii qalliinkaaga dayactirka bararka halbowlaha (EVAR) loo maleeyo inuu farsamo ahaan toosan yahay, waxay u badan tahay in lagu sameeyo suuxin maxalli ah, taasoo lagu duri doono haragga gumaarkaaga si loo kabuubiyeeyo aagga ay tuubada la gelin doono. Mararka qaarkood farsamooyinka suuxin goboleed (laf-dhabarta iyo epidurals xuubka maskaxda) ayaa la isticmaali karaa. Waxaa lagaa rabaa inaad si siman u jiifsato hal ilaa laba saacadood. Waad soo jeedi doontaa waxaana laga yaabaa in lagu siiyo suuxdin si ay kaaga caawiso inaad nasato.

Haddii qalliinkaaga dayactirka halbowlaha (EVAR) loo maleeyo inuu adag yahay ama uu dheer yahay, waxaad u baahan kartaa suuxdin guud. Xaaladaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaad u baahato dhacaan laf dhabarta (eeg 'Qalabka iyo la socodka la isticmaalo inta lagu jiro qalliinka xididdada dhiigga').

Inta badan bukaanada soo maray nidaamka caadiga ah ee dayactirka bararka halbowlaha (EVAR) ayaa ka soo kabsada qaybta qalliinka. Bukaanada soo maray nidaamka dayactirka bararka halbowlaha (EVAR) adag waxaa laga yaabaa in laguugu xanaaneeyo HDU ama ICU isla markiiba qaliinka ka dib.

## Qalliinka halbowlaha lugahaaga (halbowlaha lafta bowdada)

Qalliinka noocaan ah waxaa loo isticmaalaa in lagu hagaajiyo qulqulka dhiigga ee halbawleyaasha lugaha bukaanada la ildaran cudurka cudurka halbowlayaasha durugsan (PAD). Tan waxaa loo yaqaan ''revascularization''(dib-u-laabashada xididdaha dhiiga).

Waxaa jira laba nooc oo waaweyn oo ah daawaynta dib-u-laabashada xididdaha dhiiga ee PAD:

- Angioplasty (xannibidda xididdada dhiigga): halka qayb xiran ama dhuuban oo halbowle ah ay balaadhiso iyada oo la buufinayo buufin yar oo gudaha ah.
- Halbowle-mareenka tallaalka halbowlaha: halkaasoo halbowle xiran la maro iyadoo la adeegsanayo mid ka mid ah xididdada dhiiggaaga (badanaa xidid) ama la isticmaalayo qalab macmal ah

### Suuxdintaada qalniinka xididada dhiiga

Nidaamyadan waxaa lagu fulin karaa iyadoo la adeegsanayo suuxinta guud ama farsamada suuxinta gobolka (laf-dhabarka ama epidural'ka xuubka maskaxda) - fadlan ka eeg shabakadeena macluumaad dheeraad ah oo ku qoran luqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

Suuxinta maxaliga ah ayaa sidoo kale laga yaabaa in lagu duro si loo kabuubiyo neerfayaasha siiya qaybaha lugtaada. Tan waxaa loo yaqaannaa xannibaadda neerfaha. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages. Tani waxay ku siinaysaa xanuun baabi'in fiican ilaa 12 saacadood waxayna yarayn kartaa cadadka xanuunka dilaaga ah ee aad u baahan tahay qaliinka ka dib.

Farsamada adiga kuu fiican ayaa la go'aamin doonaa ka dib wada-hadal dhexmara adiga, dhaktarkaaga suuxinta iyo dhakhtarkaaga qaliinka, iyadoo la tixgelinayo taariikhdaada caafimaad iyo jirdhiskaaga.

Qalliinka lugaha hoose wuxuu qaadan karaa waqti dheer waxaana laga yaabaa inaad u baahato inaad si siman dhabarka ugu seexato dhowr saacadood. Haddii aadan awoodin inaad si siman u jiifsato muddo dheer, markaa suuxinta guud ayaa ah doorashada ugu fiican. Haddii farsamada qaas ah la isticmaalo ka dib aya dawada miyir qabka ayaa loo isticmaali karaa inay kaa caawiso inaad nasato inta lagu jiro hawsha.

Qalitaanka ka dib, waxaad aadi doontaa meel gaar ah oo soo kabasho ah halkaas oo si dhow lagula socon karo. Kalkaaliyaasha ayaa hubin doona in dhiiggu si fiican ugu socdo cagaha iyo lugaha. Kadib waxaad ku laaban doontaa qaybta qaliinka ilaa aad u baahato la socodka dheeraadka ah, markaas oo aad aadi karto HDU.

## Qalabka iyo la socodka la isticmaalo xilliga qaliinka xididdada dhiigga

Inta lagu jiro qalliinka xididdada dhiigga wadnahaaga iyo neefsashadaada waa in si taxadar leh loola socdaa. Kuwan hoose wa qaar ka mid ah cabirayaasha iyo qalabka ugu badan kuwaas oo bukaannada badankood ay la kulmi doonaan:

- **ECG "nuuc kamid ah computerrada wadnaha akhriya" (electrocardiogram):** waa raad ka mid ah dhaqdhaqaaqa korantada ee wadnahaaga. Suufaf dhegdheh ah oo ku dhegan filooyinn ayaa laabtada lagu dhejiyaa.
- **Qalabka lagu ogado cadaadiska dhiigga:** wuxuu la socdaa cadaadiska dhiiggaaga isagoo gacanta tuujinaya saddex ilaa shantii daqiqoba mar inta lagu jiro qalitaanka
- **Kormeeraha buuxinta ogsijiinta:** biin yar ama ayaa la saarayaa fartaada, suulasha ama xuubka dhegta waxaana lagu cabbiraa heerarka ogsijiinta ee dhiigaaga
- **Dhexgelida xididga canulada (IV line):** tuubo yar oo balaastiig ah (cannula) ayaa la galinayaa gadaasha gacantaada si ay u keento daawooyinka iyo dareerayaasha aad u baahan doonto inta lagu jiro qaliinka
- **Xariiqda halbowlaha:** oo la mid ah xariiqda IV laakiin la geliyo halbowle (sida caadiga ah curcurka, halkaas oo aad dareemi karto garaaca wadnaha) si joogto ah loola socdo cadaadiska dhiiggaaga wakhtiga dhabta ah. Tan waxa loo isticmaalaa in si joogto ah loola socdo cadaadiska dhiiggaaga wakhtiga dhabta ah. Waxa kale oo loo isticmaali karaa in dhiig laga qaado si loo baadho.

Marka lagu suuxiyo, qalabka soo socda ayaa sidoo kale la isticmaali karaa iyadoo ku xiran qalliinka aad sameyneyso iyo xaaladdaada caafimaad:

- **Tuyubka neefsashada:** kaliya loogu talagalay Suuxdinta guud. Tan waxa afkaaga laga geliyaa hunguriga cad (trachea) (tuyubka dabaysha) si ay u caawiso neefsashadaada inta lagu jiro qaliinka. Waxa la gelinayaa marka lagu suuxiyo

waana laga saaraya markaad kacdid Macluumaad dheeraad ah saabsan Hawo mareenkaaga iyo neefsashada inta lagu gudo jiro suuxdinta ayaa ku diyaara luuqado kala duwan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

- **Falembada xididka dhexe (central venous catheter (CVC)):** xididka weyn (IV) cannula kaas oo la galiyo mid ka mid ah xididdada qoorta. Waxay u ogolaataa dhakhtarka suuxinta inuu bixiyo daawooyin iyo dareerayaal badan oo kala duwan isku mar. Mararka qaarkood tan ayaa la galaa markaad soo jeeddo, laakiin suuxintaada ayaa ku duri doona suuxinta gudaha si uu maqaarka u kabuubiyo oo u yareeyo dhib kasta. CVC waxaa badanaa lagu hayn karaa hal maalin ama ka badan ka dib qalitaankaaga haddii aad u baahan tahay
- **Mashiinka codka ee lugu ogaado uur ku jirta Ultrasound:** haddii aad u baahan tahay suuxin heer gobol ah ama xannibaad neerfaha ah, dhakhtarka suuxinta ayaa laga yaabaa inuu isticmaalo qalabka ultrasound si uu uga caawiyo inay ku duraan meesha saxda ah.
- **Transoesophageal echocardiogram (TOE)**: Marka lagu suuxiyo suuxdinta guud dhakhtarka suuxinta wuxuu kaa saari doonaa tuubada ultrasound (transoesophageal echocardiogram ama TOE) afkaaga dhanka caloosha hoosteeda si ay u siiyaan sawirada wadnahaaga inta lagu jiro qaliinka. Tan waxa laga soo saarayaa ka hor intaadan toosin.
- **Falembada kaadi mareenka:** tuubo la geliyo kaadiheystaada si ay kaadida u soo ururiso. Waxaa laga yaabaa inaad soo jeeddo marka tan la geliyo, laakiin suuxinta goob yar oo jirka ka mid ah ayaa loo isticmaali doonaa si loo yareeyo raaxo la'aanta
- **Dhicaan daadiyaha laf dhabarta:** tani waa tuubo yar oo dabacsan oo la geliyo laf dhabarta hoose si ay u daadiso qaar ka mid ah dareeraha cerebrospinal (CSF), kaas oo ku wareegsan xudunta laf dhabartaada iyo maskaxdaada si ay uga ilaaliso dhaawaca. Tani waxay wanaajin kartaa socodka dhiigga ee xudunta laf dhabarta ka dib hagaajinta adag aortic aneurysm (ee goob bararsanoo jilicsan eeku taalo halbowlaha ugu wayn) halkaas oo qayb aad u dheer oo aorta(xiddika halbowlaha ugu wayn ee quudiyo jirka oo dhan) ah ay saamayso. Haddii aad u baahato tan, dhakhtarta suuxiyaha iyo dhakhtarkaaga qalinka ayaa si faahfaahsan ugala hadli doona.

## Mashiinka badbaadinta unugyada iyo dhiig shubid

Dhiig shubid ayaa laga yaabaa in loo baahdo dhammaan qalliinnada waaweyn, laakiin dhiigaga lagu deeqay waxa la siin doonaa oo keliya haddii loo baahdo. Dhiig shubid ayaa aad ugu badan kuwa lugaha hoose iyo qalliinka halbowlaha ah lagu sameeyo. Mar kasta oo ay suurtogal tahay waxaa la isticmaali doonaa mishiinka badbaadinta unugyada; Tani waxay ururinaysaa dhiiggaaga, maydhaysaa ka dibna kuu soo celinaysa, adigoo ka fogaanaya baahida lagu shubo.

# Xanuun baabi'iye qaliinka ka bacdi

Dadka qaarkood waxay u baahan yihiin xanuun-baabi'iye ka badan kuwa kale ama waxay si kala duwan uga fal-celiyaan daawooyinka xanuunka yareeya. Mararka qaarkood, xanuunku waa calaamad digniin ah in xaaladda jirka aysan fiicnayn, marka waa inaad u sheegtaa shaqaalaha ku daryeelaya haddii aad xanuun dareento.

Dhakhtarta suuxiyaha ayaa kaala hadli doona xulashooyin kala duwan si ay kaaga caawiyaan maareynta xanuunkaaga qaliinka ka dib.

Caadi ahaan waxaa lagugu siin doonaa xanuun baabi'iye joogto ah oo afka ah ama laynka faleebbahaaga. Qalitaanka xididadaada ama dhiiga lugahaaga waxaa laga yaabaa in dhakhtarta suuxiyaha uu sidoo kale kaala hadlo fursadaha soo socda:

## Cirbad kabuubiso joogtada ah

Haddii aad leedahay moxoga,aya falembada moxoga ayaa meesha looga tagayaa dhamaadka qalliinka waxaana lagu xirayaa bamka si loogu duro daawada suuxinta iyo xanuunka baabi'inta sida loo baahdo qalitaanka ka dib. Waxaa laga yaabaa in xoogaa kabuubyo ah calooshaada iyo lugahaaga korkooda, addimadaaduna ay dareemaan culeys ka badan inta caadiga ah ilaa bamka laga joojiyo. Epidural'ku wuxuu joogi karaa dhowr maalmood qalliinka ka dib.

## Xanuun baabi'iye maareyntiisa leeyahay bukaanka (PCA)

Kani waa bamka xanuunka kaa joojiya ee ku xidhan cannulahaga kaas oo aad naftaada xakamaynayso adiga oo badhan riixaya. Bamka ayaa leh qeyb badbaadin ah oo ka hortageysa in aad si lama filaan ah u qaadatid in ka badan intii laguugu tala galay dawada.

## Falembada nabrada

Suuxinta maxalliga ayaa lagu durii nabarkaaga iyadoo la raacayo hal ama in ka badan oo tuyubooyinka balaastikada ah si loo kabuubyo aagga qalliinka. Dhakhtarka qalliinka ama dhakhtarta suuxiyaha ayaa tuyubooyinkaas kugu xiriirinaaya inta qalliinka lagu guda jiro. Falembada nabarka wuxuu kugu xernaan karaa dhowr maalmood qalliinkaaga ka dib.

## Xannibaaha neerfaha

Suuxinta maxaliga ah ayaa lagu duraa agagaarka neerfaha kuwaas oo bixiya qaybo ka mid ah meelaha qaliinka. Mashiinka ultrasound ayaa loo isticmaalaa si loo helo neerfayaasha iyo in la hubiyo in suuxinta maxalliga ah si badbaado leh loogu duro. Tan waxa la samayn karaa marka aad soo jeedo ama suuxsantahay iyadoo ku xidhan qaliinka

# Halista iyo go'aan gaarista la isla wadaago

Suuxinta casriga ah aad bay ammaan u tahay. Waxaa jira wax yeelooyin yar oo inta badan ka imaada daawooyinka suuxinta ama qalabka loo adeegsado, kuwaas oo badanaa ahayn wax aad u daran ama waara. Shaqsiyaadku way ku kala duwanaan doonaan halistu waxayna ku xirnaan doontaa qaabka iyo farsamada loo isticmaalo.

Waxa jira khataro gaar ah oo la xidhiidha suuxinta qalliinka xididdada dhiigga, oo ay ka mid yihiin dhiig-baxa, caabuqa iyo dhaawaca wadnaha iyo kelyaha.

Dhakhtarkaaga suuxinta ayaa kaala hadli doona halistu ay rumeysan yihiin inay aad kuugu muhiimsantahay iyo sida loo yarayn karo. Waxay ka hadli doonaan oo kaliya halisaha aan caadiga ahayn haddii ay adiga kugu khuseeyaan.

Waxaad ka akhriyi kartaa wixii faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan khataraha la xidhiidha suuxinta boggayaga, kaas oo aad ka heli karto luqado kala duwan halkan: www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

## Go'aan gaarista leysla wadaago

Go'aan gaarista leysla wadaago waxay hubisaa in shakhsiyaadka la taageero si ay u gaaraan go'aamo iyaga ku habboon. Waa hab wada shaqeyneed oo uu takhtarku ku taageero bukanka si uu go'aan oga gaadho daawaynta.

Wada sheekeysigu wuu isku keenaa:

- khibrada dhakhtarka, sida fursadaha daawaynta, caddaynta, halista iyo defooyinka
- waxa uu bukaanku si fiican u garanayo: dokhooda, durufahooda gaarka ah, yolalka, dhaqankooda iyo waxa ay aaminsan yihiin.

Wax badan ka ogow: www.england.nhs.uk/personalisedcare/shared-decision-making

Waa kuwan qaar ka mid ah qalabyada aad isticmaali karto si aad sida ugu fiican uga faa'iidaysato wada-hadalladaada aad la yeelato dakhtarkaa suuxinta ama qiimaynta qalliinka ka hor:

### Doorashada qaab dhismeedka BUUNSHA caqli galka ah UK

U isticmaal tan xasuusin ahaan si aad u weydiiso su'aalo ku saabsan daweynta.
https://bit.ly/CWUK_leaflet

### Waydii waxda caafimaadka ee NHS seddex su'aalood

Waxay siindoontaa xolashooyin badan oo ku saabsan daryeelkaga caafimaad.
https://bit.ly/NHS_A3Qs

### Xarunta Daryeelka Qalliinka Ka Hor (CPOC)

CPOC waxay soo saartay filmanta boombalaha ah si ay kuugu sharaxdo waxa ay tahay go'aan qaadashada la isla wadaago.
www.cpoc.org.uk/shared-decision-making

# Su'aalaha aad jeclaan laheyd in aad weydiiso

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan suuxintaada, qor (waxaad isticmaali kartaa tuusalooyinka hoose kadibna ku darso su'aalahaahga meesha bannaan ee ayaga ka hoose). Haddii aad rabto inaad la hadasho dhakhtarkaaga suuxinta kahor maalinta qalliinkaaga,la xiriir kooxda qiimaynta qalliinka ka hor kuwaas oo kuu diyaarin doona inaad taleefanka kula hadasho dhakhtarka suuxiyaha ama inaad ku aragtid xarunta caafimaadka.

1 **Waa maxay nooca suuxinta ee lagu taliyay qaliinka xididkayga?**

2 **Wax halis ah oo gaar ah miyay ii leedahay aniga?**

3 **Waa noocee xanuun baabi'iyaha aad uu maleeneysa inuu aniga ii fiican yahay?**

4 **Ma waxaa u baahan doonaa inaan joogo HDU mise ICU?**

5 **Intee soo kabashadu qaadanaysaa?**

6 ...

7 ...

8 ...

# Halkee ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Cusbitaalada intooda badani waxay soo saaraan waraaqo macluumaad ah oo iyaga u gaar ah oo ku saabsan qalliinka wadnaha qaar badan oo ka mid ahna waxay ku kooban yihiin macluumaad ku saabsan suuxinta.

Waxa ka heli kartaa buug-yareyaal ay ku qoranyihiin macluumaad dheeraad ah websaydka Kulliyadda:
www.rcoa.ac.uk/patientinfo/translations#languages

Waraaqahaasi waxa kale oo laga yaabaa in laga helo waaxda suuxinta ama rugta qiimaynta hore ee cusbitaalkaaga.

## Ilaha macluumaadka ee dheeraadka ah

- Bulshada Vascular ee Great Britain iyo Ireland (www.vasgbi.com).
- Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Qalliinka ee England (http://bit.ly/2LNAY52)
- Duqyada NHS (www.nhs.uk).
- GP gaaga

## Afeefasho

Waxaan aad ugu dadaalaynaa in macluumaadka ku jira qoraalkan yar ay noqdaan kuwo sax ah oo ilaa hadda, laakiin annagu ma ballan qaadi karno tan. Uma fileynno macluumaadkan guud inuu daboolayo dhammaan su'aalaha aad qabtid ama waxkasta oo aad kuugu muhiim kuu ah. Waa inaad kala hadasho xulashooyinkaaga iyo wixii walwal ah ee aad ka qabto kooxda caafimaadkaaga, adoo u isticmaalaya buug-yarahaan sidii hagge ahaan. Buug-yarahaan keligiis looma tixgalin doono talo ahaan. looma isticmaali karo ganacsi ahaan ujeedo. Qiimayn buuxda, fadlan halkaan riix
(www.rcoa.ac.uk/patient-information/translations/somali).

Dhamaan turjumaadahan waxaa bixiya Translators without Borders' (Turjubaanada bilaa xuduudaah') bulshada turjubaanka. tTayada tarjumaadahaan waxaa loo hubiyaa inay ka dhigayaan tarjumaadaha sida ugu macquulsan, laakiin waxaa jirta halis ah khaladaad iyo marin habaabinta macluumaadka qaar.

# Noo sheeg sida aay kula tahay

Haddii aad hayso wax talooyin ah, fadlan imaylka ku soo dir:
patientinformation@rcoa.ac.uk

**Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta**
Churchill House, 35 Red Lion Square, London WC1R 4SG
020 7092 1500

# www.rcoa.ac.uk

## Daabacaadda saddexaad, Sebteembar 2023

Buug-yarahan waxaa dib u eegis lagu samayn doonaa saddex sano gudahood laga bilaabo taariikhda la daabacay.

**© 2023 Kulliyadda Royal ee Dhakhaatiirta Suuxinta**
Xaashidan waxa laga yaabaa in laso koobiyeeyo si loo soo saaro agabka macluumaadka bukaanka. Fadlan tixraac ishan asalka ah. Haddii aad rabto inaad qayb ka mid ah buug-yarahaan ku isticmaasho daabacaad kale, waa in la bixiyaa qirasho ku habboon oo laga saaro calaamadaha, sumadaha, sawirada iyo astaamaha. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan nala soo xiriir.